Wixii ku saabsan Adeegyada bukaan-socodka dadweynaha

Su'aallaha badanaa la isweydiiyo

Waa maxay adeegyada bukaan socodku?

Isbitaalada dadweynaha ee Fiktooriya waxay siiyaan adeegyo bukaanada u baahan daaweyn khaasa, carruurta, dumarka uurka leh ama qiimayn qaliin iyo daryeel. Waxay kaloo bixiyaan adeegyada isbahaysiga caafimaadka ee xiriirka la leh sida daaweynta dabiiciga ah ee loo yaqaan Physiotherapy iyo baaritaanka raadista-cudurka. Adeegyadaan waxaa badanaa loo yaqaan adeeyada bukaan socodka, kuwaas isbitaalka dadweynuhu siiyo la tashi ama waxqabad qof aan hadda jiifin isbitaalka.

Sidee ballanta looga sameeyaa adeega bukaan socodka?

Bukaanka ayaa loo xawilaa adeegyada bukaan socodka waxaana soo xawila dhakhtarka guud (GP) ama mid takhasus ah. Marmarka qaarkood bukaanada waxaa loo xawilaa qaybta bukaansocodka si halkaas loogala socdo ka dib marka lagu daweeyo waaxda xaalladaha degdega ah ama ka dib marka qaybta bukaan jiifka laga saaro.

Xawilaadaha siyaallo kala duwan ayaa loo sameeyaa. Tusaale ahaan, dhakhtarka guud wuxuu soo jeedin karaa in qofka uu qiimeeyo dhakhtar takhasus ah xaallad gaar ah. Dhakhtarkaaga guud ayaa qori doona warqad xawilid ah oo qofka bukaan socodka loogu bedeli doono isbitaalka dadweynaha. Warqadaan xawilaada ah waxay ku socotaa dhakhtar takhasus ah ama koox dhakaatiir takhasus ah. Dhakhtarkaaga guud ayaa boostada ugu diri doona ama fakis ugu diraya adeega bukaanka socodka ay khusayso.

Intaan ballan la samayn, adeegyada bukaan-socodka ayaa kala hufid ku sameeya xawilaada ay hellaan iyadoo ku xiran xaallada caafimaad. Adeegyada caafimaadka shakhsiyeed waxay leeyihiin boratakoollo iyo hab-nadaameed lagu xaqiijiyo in bukaanadu yihiin bukaan socod iyadoo laga eegayo xaalladooda caafimaad.

Dhakhaatiirta guud ayaa door fiican ka cayaara habkaan waxayna siiyaan macluumaad adeega caafimaadka iyagoo ku soo qoraya warqada xaalladaada caafimaadka si habka kala hufido ballantaada loo meelmariyo.

Markuu adeega bukaan socodku hello kala xawilaadaada adiga iyo dhakhtarkaaga ayey la soo xiriiri doonaan, si laguu siiyo talo la xiriirta ballantaada.

Ilaa intee ballantaydu shaqaynaysaa?

Xawilida dhakhtarka guud waxay shaqaysaa ilaa 12 bilood laga bilaabo ilaa ballantaada ugu horraysa. **Xawilaada dhakhtarka takhasuska ah** oo loo dirayo dhakhtar kale oo takhasus ah waa ilaa 3 bilood laga soo bilaabo maalinta xawilida.

A Victorian Government initiative

Victoria The Place To Be

Sidee la igula socodsiinayaa ballantayda?

Waxaad helli doontaa warqad ama telefoon ka yimid adeega bukaansocodka oo kuu samaynaya ballan. Waxaa laga yaabaa inaad hesho warqad la xiriirta ballantaada iyadoo ay ku xiran tahay siday lagama maarmaan u tahay, tusaale, dhakhaatiirta qaarkeed ayaa laga yaabaa inay codsadaan baaritaano khaasa oo la dhamaystiro ballantaada ka hor sida raajada ama baaritaanka dhiiga.

Ilaa intee in le'eg ayaan sugayaa ballanta?

Waqtiga sugitaanka ee ballantu waa kala-duwan yahay dhamaan dhakhtarada takhasuska iyo adeegyada caafimaadka.

Haddii aad welwel ka qabto maaraynta xaalladaada ilaa laga gaarayo ballantaada, waxaa laga yaabaa inaad la hadasho dhakhtarka ku xawilay aadna kala hadasho wixii xal ah oo kuu yaalla.

Macluumaad noocee ah ayaan ka hellayaa adeegyada bukaansocodka?

Nambarka lagala xiriirayo: waxaa lagu siinayaa nambar telefoon oo lala xiriirayo haddii aad qabto wax su'aalla wixii khuseeya ballantaada.

Nambarka aqoonsiga bukaanka: waxaa laga yaabaa inaad hesho nambar laguu gaar yeellay oo bukaan iyadoo ku xiran adeega caafimaad. Nambarkani adiga ayuu khaas kuu yahay. Markaad wacdo isbitaalka had iyo jeer nambarkaas tixraac. Tani waxay ka caawintaa shaqaalaha inay arkaan ballantaada bukaan socodka kana jawaabaan su'aallahaaga.

Khariidad muujinaysa xalalka gaadiidka, gaari dhigashada iyo qaybta bukaan socodku ku taal.

Maclumaadka **Xuquuqda iyo waajibaadka** bukaanka.

Macluumaadka turjubaanka: waxaad kaloo helli doontaa macluumaadka hellida turjubaanka iyo nambar la wacayo si aad u hesho mutarjum. Fadlan hubi warqadaada waqtiga ballanta la samaysan karo maadama ay adag tahay inaad ku dalbato muddo gaaban.

Maxaan samaynayaa haddii faahfaahintadu is bedesho?

Waa muhiim inaad soo wacdo ama waraqad u soo dirto haddii aad bedeshay cinwaankaaga ama telefoon nambarkaaga. Taasi waxay xaqiijinaysaa in adeega bukaan socodku kula xiriiri karo.

Maxaan samayn karaa haddii xaalladaydu sii xumaanayso?

Haddii aad qabto wax welwel ah oo xaalladaada ku saabsan ama caafimaadka ballantaada ka hor waxaa waajiba inaad la xiriirto dhakhtarkaaga guud wixii talo ah. Dhakhtarkaaga ayaa ah maareeyaha ugu fiican oo xaalladaada ilaa dhakhtarka lagugu arko ama in lala taliyo adeega caafimaadka haddii xaalladaadu ka soo darayso.

Dhakhtarkaaga guud ayaa isagana laga yaabaa inuu soo jeediyo daaweyn kale taas oo laga yaabo intaad sugayso inaad ku aragto dhakhtar takhasus ah adeega bukaan socodka.

Maxaan samaynayaa haddii aan u baahdo macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan bukaan socodka?

Waxaad la xiriiri kartaa shaqaalaha bukaan socodka adoo wacaya nambarka guud ee isbitaalka kaas oo ku muujisan warqada ay kuu soo direen adeega caafimaadku.

Sidee u bedelaa ballantayda?

Haddi aad doonayso inaad bedesho ballantaada fadlan la xiriir adeega bukaan socodka sida ugu dhaqsaha badan. Faahfaahinta cidda lala xiriirayo waxay ku qoran tahay warqada aad ka heshay isbitaalka. Shaqaaluhu waxay awoodi doonaan inay ballantaada geeyaan taariikhda iyo waqtiga kugu haboon, marka ballantaas la helli karo.

In aadan tegin ballantaada waxaa laga yaabaa inay daaweyntaada ku keento dib u dhac. In aadan u sheegin bukaansocodka baaqashadaada waxay hor istaagi kartaa in qof kale la siiyo ballanta. Fadlan u sheeg qaybta bukaan socodka isla markaad ogaato in aadan tegin karin ballanta. Haddii aad lumiso ballama badan adoo aan u soo sheegin qaybta bulaan socodka waxay saamayn kartaa muhiimada lagaga hellayo xawilaad dhakhtarka guud.

Maxaan samayn karaa haddii aanan u baahnayn ballanta bukaansocodka?

Haddii aadan u baahnayn ballantaada fadlan u sheeg isbitaalka ay khusayso.

Waxaad caawimi kartaa inaad hoos u dhigto waqtiga sugitaanka adoo xaqiijinaya inaad u sheegto rugta caafimaadka haddii aadan iman karin.

Maxaan samayn karaa haddaan qabo baahi gaara?

Isbitaaladu way awoodaan inay caawimaan bukaanada qaba baahi khaasa markay imanayaan ballanta bukaansocodka. *Haddii aad qabto baahi maqal ama arag ama u baahan tahay mutarjum*, waa muhiim inaad u sheegto adeega bukaansocodka ka hor ballantaada sidaas darteed caawimo ayaa laguu diyaarin karaa.

Xaq ma u leeyahay caawimada gaadiidka?

Bukaanada magaalada ka baxsan

Victorian Patient Transport Assistance Scheme (VPTAS) (Mashruuca Caawimada Gaadiidka Bukaanada Reer Fiktooriya) wuxuu doonayaa inuu caawimo dadka reer Fiktooriya ee degan meelaha durugsan kuwaas oo u baahan inay u safraan meel ka fog gurigooda si ay u hellaan daaweyn ama wax ka qabasho ilkood taas oo uu ansixiyey dhakhtar takhasus ahi. Si uu xaq ugu yeesho caawimadaas bukaanku waa inuu degan yahay gobolada fogfog kana soo safrayaa 100 kiloomitir meel jirta, ama iskucelcelis ahaan 500 kiloomitir asbuucii muddo shan asbuuc ah ama ka badan si qofkaasi u hello daaweynta dhakhtar takhasus ah oo la aqoonsan yahay.

Mashruuca Caawimada Gaadiidka Bukaanada Reer Fiktooriya wuxuu bixiyaa caawima dhaqaale oo dhinacyada deegaanka iyo safarka. Si kasta ha ahaatee, loogama jeedo lacag bixin buuxda, balse waxaa looga jeedaa kabida kharajka ay galeen dadka goobaha durugsan degan ee reer Fiktooriya kuwaas oo looga baahan yahay inay hellaan daaweyn takhasus ah.

Si loo xaqiijyo in caawimada la siiyo halka aadka loogu baahan yahay, bukaanadaas xaqa u leh waa inay ku dalbadaan ururo kale oo diiwaangashan, kuwa ay ku jiraan Department of Veterans Affairs (Wasaarada Arrimaha Dadka-shaqada ka fadhiistay), xaq uma laha inay codsadaan sida waafaqsan VPTAS maadaama ay ku dalban karaan Wasaarada Arrimaha Dadka shaqada ka fariistay. Intaas ka sokow, Department of Veterans Affairs (Mashruuca Caawimada Gaadiidka Bukaanada Reer Fiktooriya) caawimadu ma khusayso bukaanka ku safraya ambalansida, diyaarada ama gaadiidka kaalmada xaalladaha degdega ah; mana khusayso kharajka kale ee ay galaan intay ku sii socdeen goobta daaweynta sida goobta gaari dhigashada ama tigidyada e-tag-ga.

Bukaanada agagaaraha

Haddii aad u baahan tahay gaadiid fadlan kala hadal dhakhtarkaaga guud nooca gaadiidka ah ee aad rabto inuu ku geeyo kaagana soo celiyo ballantaada. Waxaa jira dhowr nooc oo gaadiid ah oo la helli karo, sida Red Cross (Laanqayrta Cas), iyo tabarucayaasha bulshada. Caawima gaadiid oo takhasus ah ayaa la siiyaa dadka qaba dhibaato caafimaad ballantana uu u sameeyey adeega caafimaadku. Macluumaad intaas ka badan oo gaadiidka rugta xaalladaha degdegta ah ee bukaan socodka ayaa laga hellaa websaytka Metropolitan Ambulance Service (Adeega Ambalansida Magaalaweynta).

www.mas.vic.gov.au/Main-home/What-We-Do/Non-Emergency-Services/Clinic-Transport-Services.html

Waa maxay saacadaha adeegyada bukaan socodku?

Adeegyada bukaansocodka badankood waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha 8:30 subaxii ilaa 4:30 galabtii maalmaha fasaxyada waa xiran yihiin.

Maxaan u baahnahay in aan samayeeyo ballantayda ka hor?

Ballantaada ka hor, fadlan xaqiiji in aad:

- Heshay natiija walba oo ballantaada loo baahan yahay
- Samayso liistada daaweyn kasta ama wixii cunta lagu qaato oo aad cunto
- Qor su'aal kasta oo aad qabto oo aad weydiinayso dhakhtarka (waxaa fiican inaad arrintaan horay u sii samayso).

Maxaan u baahanhay maalinta ballanta?

Maalinta ballanta fadlan keen:

- Warqada ballanta ee aad ka soo qaadatay rugta bukaan socodka
- Wax kasta oo lagaa qaaday sida raajo, scans (CT ama Ultra-sound), baaritaanada dhiigga ama natiijooyin kale
- Liistada daawada aad hadda qaadato
- Medicare-kaaga, kaarka hawlgabka (haddaad haysato mid) ama kaar kasta oo kale oo ah nooca dhimida ah ood haysato (medicare-kaaga waa inaad mar walba siisaa rugta bukaansocodka aad tegayso)
- Dhakhtarkaaga cinwaankiisa iyo telefoonkiisa

- Daawo kasta ama waxaad qaadato *oo aad u baahan tahay waqtiga booqashadaada* (isbitaalla badan ayaa leh meel kaffee laga cabo ama wax khafiifa laga cuno, laakiin waxaa laga yaabaa inaad cuntadaada keensato)
- Tooyis yaryar ama buugaag haddii ilma kula socdaan markaad rugta caafimaadka joogto.

Goobt gaari dhigasho ma la helli karaa?

Halka bukaanka la dhigo/ ama laga qaado badanaa meel dhow ayey ku yaalliin. Adeegyada caafimaadku waxay awoodi doonaan inay ku siiyaan macluumaad ku saabsan gaari dhigashada iyo qiimaha gaari dhigashada.

Maxaan samaynayaa markaan imaado qaybta bukaan socodka?

Markaad timaado, fadlan tag miiska soo dhowaynta si aad isu qorto. Shaqaalaha ayaa eegi doona faahfaahintaada waxaana laga yaabaa inay ku weydiiyaan medicare-kaaga. Dabadeedna waxay kugu jahayn doonaan goobta sugida ee rugtaada caafimaadka.

Intee ballantaydu qaadanaysaa?

Waa muhiim inaad si degan u akhrido warqad kasta oo aad ka hesho adeega bukaan socodka oo ku saabsan ballantaada, iyo waxyaallaha aad la imanayso ballantaada.

Waxaa lagu talinayaa inaad ogolaato in ballantaadu qaadan karto sugitaan gaari kara ilaa laba saacadood. Dhamaan bukaanada waxaa la siiyaa ballan mucayina rugtana waxaa loo qorsheeyaa si ku xiran tirada shaqaalaha ka shaqeeya muddo loo arko inay ku qaadanayso qofkiiba. Waxaa dhici kara in hal qof ka badan ku qoran yahay halkii ballanba sababtoo ah hal shaqaale ayaa halkii marba wax qabanaya.

In kastoo ballamuhu waqti loo dhigay, daahid ayaa si lama filaana u dhici karta. Shaqaalaha ayaa waxaa daahin kara xaallad u baahan latashi dheer si looga hadlo daaweyn qalafsan ama baarista-cudurka bukaanka, ama qofka hawsha qabanayaa looga baahan karaa meel kale oo isbitaalka ka tirsan. Haddii daahid noocaas oo kale ahi dhacdo, waxaa kuu sheegi doona shaqaalaha rugta caafimaadka. Ballan kale ayaa laguu qabanqaabin karaa haddii aadan sugi karin ballanta.

Qorshayso inaad timaado toban daqiiqo ka hor ballanta la qorsheeyey si aad u ogolaato dhamaystirida wixii warqada ah oo laga yaabo in loo baahdo in la buuxiyo, khaasatan booqashadaada ugu horraysa.

Ma I arkayaan ardadu?

Bukaanka waxaa arki doona mihnadlayaal badan oo caafimaad kuwaas oo ay ku jiraan dadka waxbaranaya oo ka socda isbahaysiga caafimaadka, kalkaaliyayaasha iyo kuwa daawada oo heerar kala duwan oo tababareed leh. Isbitaalada dadweynuhu waa kuwa waxbarasho waxaana looga jeedaa in ardadu dhexgalaan oo la shaqeeyaan bukaanka si loo siyaadiyo aqoontooda caafimaad. Si kasta ha ahaatee bukaanku xaq ayuu u leeyahay inuu diido inuu arday arko.

Dhakhtarkaagu waa inuu ku baraa shaqaalahaan. Haddii aad jeclaan lahayd in aanay jirin dad siyaado ah oo jooga fadlan u sheeg dhakhtarka. Taasi sinaba wax u yeelli mayso daryeelkaaga.

Su'aallo ma weydiin karaa waqtigayga?

Inat lagu eegayo waxaad weydiin kartaa dhakhtarka, kalkaalisada ama shaqaalaha isbahaysiga su'aashaad doonto. Haddii aadan fahmin wax uun lagu sharxay, weydiiso in mar kale laguu sharxo.

Sidee ku helli karaa shahaado caafimaad?

Waxaad weydiisan kartaa dhakhtarka inta lagu arkayo in lagu siiyo shahaado caafimaad haddaad u baahan tahay mid.

Maxaan samaynayaa haddaan dareen ka qabo wixii ku saabsan ballantayda bukaan socodka.

Fikrad ayaad ka dhiiban kartaa wixii ku saabsan daryeelka ama adeega aad ka hesho qayb walba oo isbitaalka ka mid ah. Taasi waxay noqon kartaa mahadnaq ama dacwad.

Mid kasta oo ka mid ah Isbitaalada dadweynaha ee Fiktooriya waxay leeyihiin wakiilka bukaanka. Qofkaas ayaad la xiriiraysaa haddii aad u mahadnaqayso wixii ku saabsan daaweynta lagaa siiyey isbitaalka. Wakiilka bukaanku adiga ayuu kula shaqaynayaa si loogu hello xal wixii dacwa ah ama, hadday lagama maarmaan tahay, la sii baaro arrinta.

Wixii faahfaahin ah oo xuquuqdaada iyo masuuliyaadkaaga ku saabsan bukaan ahaan, fadlan booqo websaytka Victorian Public Hospital Character:

www.health.vic.gov.au/patientcharter/patient

Macluumaadka ku saabsan adeega bukaan socodka ayaa isagana laga hellaa adeegyada caafimaadka gaarka ah iyo websaytyadooda. Liiska adeega caafimaadka waxaa laga hellaa websaytka ah:

www.health.vic.gov.au/hospitals/index

Da'daalo badan oo kala duwan ayaa waxaa wadajir ahaan u fuliyey Wasaarada Adeegyada Aadanaha iyo Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha taas oo qayb ka ah Istaraatiijiyada Curinta iyo Hagaajinta. Shaqaalaha adeegyada caafimaadka iyo koooxaha diirid saarida macmiilaha ayaa waxay bixiyeen macluumaad ku saabsan waaya'aragnimada nadaamka bukaan socodka isbitaalka dadweynaha Fiktooriya.

Jawaabaha su'aallaha badanaa la isweydiiyo ayaa la sameeyey si loo kaalmeeyo waaya'aragnimada bukaanka iyo wada xirirka ka dhexeeya, macmiilaha iyo dhakhtarka guud. Jawaabaha waxaa isu duway Department of Human Services (Wasaarada Adeega Aadanaha) oo wada-tashi la leh wakiilada kuwa dantu kaga xiran tahay oo kala duwan aarimaha ay ku jiraan maaraynta adeegyada caafimaadka, rugaha caafimaadka iyo macmiilayaasha.

Janaayo 2008

080202

State Government Victoria Department of Human Services